



Fariintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Sibtambar 13, 2022

Ku socota: Hawl-wadaagayaasha ODDS iyo ka qayb qaatayaasha
Re: Wax ka dhaafida carruurta 1915(c) – Caawimaada ayaa loo baahan yahay

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon (ODDS) wuxuu raadinayaa jawaab celinta dadweynaha iyo faallooyin ku saabsan wax ka beddelka Wax ka dhaafida Carruurta 1915(c) ee #0117.

Codsiyada Wax ka beddelka Wax ka dhaafida Carruurta: Sharci-dejinta Oregon ayaa ansixisay Sharciga Senate-ka 710, laga bilaabo Sibtambar 1, 2021, kaasi oo ay ku jirto luqad xaddidaysa duruufaha saamaxaya xakameynta iyo noocyada xakameyn oo ka badan waxa hadda lagu ansixiyay Wax ka dhaafida Carruurta. Sharcigu wuxuu si dheeraad ah carruurta uga ilaalinayaa waxyeellada inta lagu jiro xakameynta iyada oo la iskaga baahanayo kormeerka la xoojiyay ee shaqaalaha xakameynaya ilmaha iyo kordhinta shuruudaha wax soo sheegida. ODDS ayaa cusbooneysiinaysa luqada ku jirta wax iska dhaafida si ay u waafaqdo Sharciga Senate-ka 710.

Wax ka beddelka Wax ka dhaafida Carruurta 1915(c) ee #0117 ayaa la helayaa in laga akhriyo website-ka ODDS:

<https://www.oregon.gov/dhs/Compass-Project/Pages/Waivers-Rules-Policy.aspx>.

Noocyada daabacan ee wax ka beddelka wax iska dhaafida ayaa la soo geliyay [Barnaamijyada Naafanimada Korrinka ee Bulshada ee degaanka](#) iyo [Hay'adaha Adeegyada Taageero](#).

Si aad u codsato noocyada daabacan, fadlan falanqeeyaha wax iska dhaafida ee ODDS Medicaid kala xiriir 503-507-2083 ama odds.info@odhsoha.oregon.gov.

Qaybaha daneynaya, fadlan faallooyinka soo gudbiya idinka oo adeegsanaya mid ka mid ah labadan hab:

1. Email ugu soo dir odds.info@odhsoha.oregon.gov.
2. Soo dir faallooyin qoraal ah oo lagu soo hagaajinayo ODDS Medicaid Waiver/State Plan Analyst, 500 Summer Street NE E-09, Salem, OR 97301.

Wakhtiga kama dambaysta ah ee loo qabtay faallooyinku waa Oktoobar 14, 2022. Jawaabaha boostada waa in la helaa taariikh-dani si loo tixgeliyo.

Waad mahadsan tahay,

ODDS

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.